

## Casharka 24

1. Kaddib markii xaaskii Ibraahim oo la oran jiray Saarah ay dhimatay, maxaa Ibraahim u sameeyey wiilkiisii Isxaaq ahaa si loo qalbi-qaboojiyey?

-Ibraahim wuxuu Isxaaq u keenay haweenay uu guursado, oo naagtiisa noqota.

2. Muxuu ahaa magacii loogu yeeri jiray xaaskii Isxaaq?

-Rebeqah.

3. Maxay ahaayeen magacyadii labadii wiil ee Rebeqah ay dhashay?

-Ceesaw iyo Yacquub.

4. Sidee baa Ilaah ku ogaaday Yacquub iyo Ceesaw ka hor intaanay dhalan?

-Ilaah wxuu garanayaa wax waliba ee khuseeya dadka oo dhan.

-Ma jiraan haddaba sheey Ilaah ka qarsoon.

5. Miyaa Ceesaw Ilaah rumaysnaa?

-Maya.

6. Miyaa Ya quub rumaystay Ilaah?

-Haa.

7. Maxaa Ilaah u doortay inuu Badbaadiyaha dunida ka yimaado qabiilkii ama faracii Yacquub?

-Waayo Ceesaw ma rumaysnayn Ilaah.

8. Masaa Yacquub ku arkay riyadii Ilaah tusay?

-Wuxuu arkay sallaan ama jaranjaro salkeedu dhulka yaallo, oo

dhaladeeduna gaadho samada darafkeeda kale.

-Malaa'igaha ahaa qaarna ay ku soo deganyeen, kuwana sii korayeen, Ilaahna wuxuu saarnaa sallaanka halka ugu sarraysa.

9. Marka la eego riyada, maxaa Ilaah Yacquub ka barayey Badbaadiyaha?

-Isla sida sallaanka ama jaranjarada ay isugu xiraysa samada iyo dhulka, ayaa Ilaah soo dirayaa Badbaadiye isku keena dadka dhulka jooga iyo Ilaaha samada jooga.

10. Maxaa Ilaah aanu u illoobi karin ballankiisa ahaa inuu soo diro Badbaadiye?

-Maxaa wacay Ilaah waxba ma illoobo

-Maxaa wacay Ilaah isma beddelo.

-Maxaa wacay Ilaah mar waliba wuxuu dhowraa ballamadiisa.

11. Maaddaama Yacquub ku noolaa dhulkii Haaraan, meeqo carruur ah ama ilmo ah ayuu lahaa?

-Laba-iyo-toban.

12. Kaddib markii Yacquub sannado badan ku noolaa Haaraan, maxaa Ilaah u sheegay inuu sameeyo?

-Ilaah wuxuu ku yiri, isaga tag Haaraan, oo ku noqo dhulkii Kancaan.

13. Muxuu ahaa magacii cusubaa ee Ilaah siiyey Yacquub?

-Israa'iil.

-Kum ayuu ahaa kii daafacay Yacquub

-Oo si nabad ah ugu keenay dhulkii Haaraan oo ku soo celiyey dhulkii Kancaan?

-Ilaah.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 37:1

1-Yacquubna wuxuu degay dhulkii aabbihiis qariibka ku ahaan jiray, oo ahaa dalkii Kancaan.

-Muxuu ahaa magaca Ilaah siiyey Yacquub?

-Israa'iil.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 37:3

3-Israa'iilna Yuusuf wuu ka jeclaa carruurtiisa oo dhan, maxaa yeelay, wuxuu ahaa inankuu dhalay markuu gaboobay; oo wuxuuna u sameeyey shulug midbyo badan leh.

-Imisa wiil buu lahaa Yacquub?

-Laba-iyoban.

-Yacquub wuxuu lahaa 12 wiil, laakiin hal mid buu iyaga ood han u wada jeclaa.

-Maxaa loogu yeeri jiray wiilkii Yacquub u jeclaa wiilashiisa?

-Yuusuf.

-Waayo Yacquub jacaylkii Yuusuf uu jeclaa awgii, wuxuu u soo iibiyey khamiis midabyo badan lahaa.

-Maaddaama Yacquub ka jecladay Yuusuf walaaladiis, maxay u keentay Yuusuf oo walaalihiis u arkeen Isaga?

-Way ka masayreen, oo nebcadeen Yuusuf.

-Yuusuf walaaladiis, waxay kaloo nebcaadeen isaga.

-Yuusuf walaaladiis waxay ku nebcaadeen Yuusuf in Yuusuf bilaabay inuu war ka geeyo iyaga, markii ay xumaan sameeyaan.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 37:2 & 4

2-Kuwanuna waa farcankii Yacquub, Yuusuf, isagoo jira toddoba iyo toban sannadood, ayuu idaha la daajinayey walaalihiis, wxuuna ahaa wiil la jooga wiilashii Bihah iyo Silfah oo ahaa naagihii Aabihiis. Markaasuu Yuufuf xaggooda wax xun uga keenay aabbahood.

4-Markaasaa walaalihiis arkeen in aabbahood ka jecle yahay isaga walaalihiis ood han; kolkaasay nebcaadeen isagii, wayna kari weeyen inay isaga si nabad ah ula hadlaan.

-Maxaa qofi qof kale ugu caroodaa?

-Maxaase qofi qof kale u nebcaadaa?

-Waayo qof waliba Ilaah wuu ka go'ay.

-Waayo qof waliba wuxuu ku dhashay dembiyada qalbigooda.

-Waayo qof waliba wuxuu u dhashaa sida carruurta Shayddaanka.

-Yuusuf walaaladiis waxay aad u nebcaadeen isagii waayo waxay dhasheen iyadoo ay Rabbiga kala dhaqaaqeen.

-Yuusuf walaaladiis waxay u nebcaadeen isaga waxaa ugu wacan inay dhasheen iyadoo qalbigoodu dmebi leeyahay.

-Yuusuf walaaladiis waxay u nebcaadeen isaga waxay ahayd inay u dhasheen sida carruurta Shayddaanka.

-Qof wlaiba wuxuu dhashay iyadoo qalbigiisu dembi leeyahay, oo innagu isma beddeli karno.

-Qof wlaiba wuxuu u dhashay isagoo ah carruurta Shayddaanka, oo isma beddeli karno.

-Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa Ilaah wuxuu u muujiyey Yuusuf riyo.

#### Bal aynu akhrinno Bilowgii 37:5-8

5-Yuusufna wuu riyooday, markaasuu riyadiisii u sheegay walaal-ihiiis, iyana aad bay u sii neccaadeen.

6-Oo wuxuu iyagii ku yidhi, Waan idin baryayaaye, bal maqla riyadan aan ku riyooday.

7-Bal eega, waxaynu beertra ku xidhxidhaynay, xidhmooyin, markaasaa xidhmadaydii kacday, oo istaagtay, xidhmooyinkiinniina hareeraheeday yimaadeen oo u sujuudeen xidhmadaydii.

8-Markaasaa walaalihiis ku yidhaahdeen, Ma annagaad na xukumi doontaa? Amase noo talin doontaa? Markaasay aad iyo aad ugu sii nebcadeen riyooyinkiisii iyo hadalladiisii aawadood.

-Maxay ahayd riyadii Ilaah u muujiyey Yuusuf?

-Waxaa riyada lagu tusay Yuusuf, isaga iyo walaaladiis oo xidhmooyin badar ah beerka ka guraya.

-Dabadeetana xidhmadiisii badarka ahayd ayaa u sujuudday

xirmadii Yuusuf xiray ee badarka ahd.

-Iyadoo ay ugu wacan tahay riyada Ilaah tusay Yuusuf, ayaa Yuusuf walaalihii aad u sii nebcaadoon.

-Wakhti kaddib ayaa haddana Ilaah Yuusuf u muujiyey riyo kale.

#### Bal aynu akhrinno Bilowgii 37:9-11

9-Markaasuu haddana riyo kale ku riyooday, oo walaalihiis u sheegay, oo wuxuu ku yidhi, Bal eega, riyo kalaan ku riyoodaye, Waxaan ku riyooday qorraxdii iyo dayaxii, iyo koob iyo toban xiddigood oo ii sujuuday.

10-Makaasuu aabbihiis u sheegay, iyo walaalihiisba, aabbihiisna waa canaantay, oo wuxuu ku yidhi, Waa maxay riyadan aad ku riyooday? Ma aniga iyo hooyadaa iyo walaalaha baa kuu iman doonna, oo intaan wejiga dhulka saarno kuu sujuudi doonna?

11-Markaasay walaalihiis xaasideen isagii; laakiinse aabbihiis maankuu ku haystay hadalkii.

-Maxay ahayd riyadii labaad ee Ilaah tusay Yuusuf?

-Wuxuu riyada ku arkay, qorraxda, dayaxa, iyo xiddigaha.

-Dabadeetana, qorraxda, dayaxa, iyo kow-iyo-toban xiddigood ayaa Yuusuf u sujuuday.

-Markii la eego riyada, qorraxda yaa u taagan?

-Yuusuf aabbihiis.

-Markii riyada la eego, dayaxana yaa u taagan?

-Yuusuf hooyadiis.

-Markii la eego riyada, yaa u taagn xiddigaha kow-iyo-tobanka ah?

-Laba-iyo-tobankii walaaladiis ahaa.

-Maxay labada riyaba ka macne ahaayeen?

-Waxay ka macne yihiin, in maalin maalmaha ka mid ah Ilaah Yuusuf ka dhigi doono nin muunad iyo sharaf leh, oo reerka Yuusuf ay ku hor dhici doonaan.

-Haddaba yaa garanayey mustaqbalka Yuusuf, oo mustaqbalkiisana ka muujiyey labadan riyo?

-Ilaah.

-Isla sidii Ilaah u garanayey mustaqbalka Yuusuf, Ilaah wuxuu kaloo u garanayaa mustaqbalkeenna.

-Ilaa iyo intee buu Ilaah ka garanayaa mustaqbalkeenna?

-Ilaah wuu wada garanayaa mustaqbalkeenna.

-Iyadoo ay ugu wacan tahay riyooyinkii Ilaah u muujiyey Yuusuf, ayaa raggii Yuusuf la dhashay oo dhan, aad iyo aad u nebcaadeen.

-Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Yuusuf soo booqday walaaladiisii oo adhi la jooga duurka.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 37:17b-20

17-Markaasuu Yuusuf walaalihii ka daba tege, oo wuxuu

iyagii ka helay Dotaan.

18-Markaasay meel fog ka arkeen isagii, oo intuusan u soo dhowaan iyagii, ayay ku tashadeen inay dilaan.

19-Oo waay isku yidhaahdeen, Bal eega, kii riyada badnaa waa soo socdaaye.

20-Haddaba kaalaya aynu dilnee, oo aynu ku tuurno ceelasha midkood, oo waxaynu odhan doonaa, Bahal xun baa cunay, Dabadeedna waxaynu arki doonaa bal waxay riyooyinkiisii noqdaan."

-Nacaylkii Yuusuf walaaladiis u qabeen wuxuu gaaray heer ay doondoonaan nay dilaan isaga.

-Balse wiilkii ugu weynaa Yacquub oo la oran jiray Ruubeen, ayaa isku dayey inuu badbaadiyo Yuusuf.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 37:21-24

21-Oo Ruubeen baa taas maqlay, isagiina wuu ka samata bixiyey gacantoodii; oo wuxuu iyagii ku yidhi, Yaynaan naftiisa ka qaadin.

22-Kolkaasaa Ruubeen ku yidhi iyagii, Dhiig ha daadinina, ee isaga ku tuura ceelkan cidlada ku yaal, laakiinse far ha saarina. Oo wuxuut aas u yeelay inuu isaga ka samata bixiyo gacantooda oo uu u celiyo aabbihii.

23-Oo waxay noqotay in markii Yuusuf walaalihii u yimid ay Yuusuf ka furteen shuluggiisii, kaasu wuxuu ahaa shuluggii midabyada badnaa oo uu qabay.

24-Kolkaasay qabteen oo ay ceelkii ku tuureen; ceelkuna waa madhnaa oo biyo kuma jirin.

-Maxay haddaba walaalihii ku sameeyeen Yuusuf?

-Waxay ka furteen khamiiskiisii, oo isagiina waxay ku tuureen ceel maran.

-Kaddib markii mid ka mid ah walaalaha oo la oran jiray Ruubeen tegey, maxay walaalihii kale ku sameeyeen Yuusuf?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 37:25-28

25-Kolkaasay u fadhiisteen inay wax cunaan; dabadeedna indhahay kor u taageen oo wax bay fiiriyeen, oo waxay arkeen safar reer Ismaaciil ah oo ka soo socda xagga Gilecaad, oo awrtooda ay ugu raran yihiin xawaash, iyo beeyo, iyo malmal, waaya u socdeen xagga Masar.

26-Markaasuu Yahuudah ku yidhi walaalihiiis, Maxaa faa'iido inoogu jirta, haddaynu walaalkeen dilno oo aynu dhiiggiisa qarino?

27-Kaalaya, aynu reer Ismaaciil ka iibinnee, oo yaynaan isaga far saarin, axaa yeelay, isagu waa walaalkeen, waana jidhkeenna. Walaalihiiisna way maqleen isagii.

28-Oo waxaa ag maray niman reer Midyaan ah, oo baayacmushtari-yaal ah. Markaasay Yuusuf soo jiideen oo ceelkii ka soo bixiyeen, oo waxay Yuusuf kuwii reer Ismaaciil kaga iibiyeen labaatan xabbadood oo lacag ah. Oo iyana Yuusuf waxay keeneen Masar.

-Yuusuf walaaladiis waxay u iibiyeen sida addoon oo kale oo waxay ku wareejiyeen rag ka ganacsada dadka.

-Halkee bay kuwii ka ganacsan jiray dadka ay geeyeen Yuusuf.  
-Masar.

-Maxay walaaladii Yuusuf sameeyeen markii Ruubeen soo

noqday?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 37:29-31

29-Markaasaa Ruubeen ku noqday ceelkii; wuxuuna arkay inuusan Yuusuf ku jirin ceelka, kolkaasuu dharkiisii dildilaaciyey.

30-Markaasuu walaalihiiis ku noqday, oo wuxuu ku dyidhi, Yarkii am joogo, haddaba anigu xaggee baa tagaa.

31-Kolkaasay shuluggii Yuusuf qaadeen oo intay orgi gowraceen ayay shuluggii dhiiggii geliyeen.

-Yuusuf walaalihiiis waxay soo qaadeen khamiiskiisii oo dhiig riyaad la dhex-geliyey, markaasay, aabbahood u keeneen.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 37:32-35

32-Markaasay shuluggii midabyada badnaa direen, oo ay aabbahood u keeneen; oo waxay ku yidhaahdeen, Kan waannu helany, haddaba bal garo inuu shuluggii wiilkaagii yahay iyo in kale.

33-Wuuna gartay, oo wuxuu yidhi, Waa shuluggii wiilkayga, Bahal xun baa cunay isagii. Shaki la'aan Yuusuf cadcad baa loo kala jeexjeexay.

34-Markaasaa Yacquub dharkiisii dildillaaciyey, oo joonyad buu dhexda ku xidhay, wiilkiisiina maalmo badan ayuu u barooranayay.

35-Kolkaasaa wiilashiisii oo dha iyo gabdhihiisii oo dhammu u kaceen inay isaga qalbi qaboojiyaan, laakiinse wuu diiday inuu qalbi qaboobo, oo wuxuu yidhi, Anigoo barooranaya ayaan qabriga geli doonaa oo wiilkaygii u tegi doonaa. Aabbihiisna wuu u ooyay isagii.

-Yuusuf walaalihiis waxay u iibiyeen walaalkood sida addoon oo kale.

-Dabadeetana walaalihiis waxay been u sheegeen Yacquub.

-Yacquubna waxay la noqotay in Yuusuf dhintay.

-Yuusuf walaalihiis way nebcaayeen.

-Nacaybkii ay Yuusuf u qabeen ayaa iyaga gaarsiiyey heer ay isaga addoonnimo u iibiyaan.

-Nacaybkii ay isaga u qabeen, ayaa iyaga u horseeday inay aabbahood been u sheegaan.

-Nacaybku mar waliba wuxuu dadka ku hoggaamiyaa dembi.

-Miyaa haddaba Yuusuf dhintay?

-Maya.

-Halkee buu Yuusuf markaa iyada ah tegey ama la geeyey?

-Yuusuf wuxuu ku sugnaa Masar.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 39:1

1-Yuusufna waxaa la keenay Masar, Kuwii reer Ismaaciil oo isaga halkaas geeyeyna waxaa gacantoodii ka iibsaday nin Masri ahaa oo la odhan jiray Footiifar, oo Fircoon sirkaal u ahaa, oo madaxii waardiyayaasha ahaa.

-Nimankii dadka ka ganacsan jiray qofkee bay addoon ahaan uga iibiyeen Yuusuf?

-Footiifar.

-Miyaa Ilaah ka tegey Yuusuf?

-Maya.

-Ilaah ma deyriyo qofka Isaga aaminsan.

-Ilaah wuxuu had iyo goorba la joogi jiray Yuusuf.

-Bal aynu idiin akhrinno waxa ku dhacay Yuusuf ka gadaal markii loo keenay Footifar.

Bal aynu akhrinno bilowgii 39:2-6b

2-Rabbiguna waa la jiray Yuusuf, wuxuuna ahaa nin liibaansan, wuxuuna joogi jiray gurigii sayidkiisii Masriga ahaa.

3-Sayidkiisiina wuu arkay in Rabbigu liibaaniyey wixii uu sameeyey oodhan.

4-Isaguna raalli buu Yuusuf ka ahaa, Yuusufna waa u adeegi jiray, oo wuxuu isagii ka dhigay kan gurigiisa u sarreeya, wixii uu haystay oo dhanna gacantiisuu wada geliyey.

5-Oo waxay noqotay in wakhtigii uu ka dhigay kan u sarreeya gurigiisa iyo wixii uu haystay oo dhan, uu Rabbigu gurigii kii Masriga ahaa u barakadeeyey Yuusuf aawadiis, wixii uu guriga iyo beertaba ku haystay oo dhanna barakada Rabbigaa saarnayd.

6-Wixii uu lahaa oo dhanna Yuusuf gacantiisuu kaga tegey. Waxbana kama ogayn wixii uu hayay, wixii uu cuni jiray mooyaane.

-Weliba inkastoo Yuusuf walaalihiis ay nebcaayeen, haddana Ilaah kama uusan tegin Yuusuf.

-Inkastoo Yuusuf walaalihiis ay addoonnimo u iibiyeen, Ilaah kama tegin Yuusuf.

-Waayo Yuusuf wuxuu rumaysnaa Ilaah, Ilaahna wuu barakadeeyey.

-Maalin, markii Footiifar baxay, ayaa dhibaato qabsatay Yuusuf.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 39:6b-18

6-Yuusufna aad uu u quruksanaa, wuuna suurad wanaagsanaa.

7-Oo waxay noqotay waxyaalahaas kaddib in naagtii sayidkiisu ay fiirisay Yuusuf, oo ay ku tidhi, Kaalay ila jiiiso.

8-Laakiinse wuu diiday, oo wuxuu ku yidhi naagtii sayidkiisa, Bal eeg, sayidkaygu waxba kama oga waxa aan guriga ku hayo; wixiisii oodhanna gacantuayduu wada geliyey.

9-Oo weliba gurigan mid aniga iga weynu ma joogo, oo saguna waxba igalama hadhin adiga mooyaane, maxaa yeelay, adiguw axaad tahay naagtiisii, de haddaba sidee baan u samayn karaa xumaantan weyn, oo aan Ilaah ugu dembaabaa?

10-Oo waxay nototay, in kastoo ay maalinba maalinta ka dambaysa la hadlaysay Yuusuf, inuu maqli waayey inuu la jiiifsado ama uu la joogo iyadii.

11-Oo waxay noqotay haddaa oo kale, inuu gurigii galay inuu shuqulkiisii qabsado, nimankii gurigana midna gudaha ma joogin.

12-Kolkaasay qabsatay dharkiisii, oo waxay ku tidhi, Ila jiiiso. Isaguse dharkiisii gacanteeduu kaga tegey, wuuna cararay oo baxay.

13-Markay aragtay inuu dharkiisii gacanteeda kaga tegey, oo uu dibadda u cararay,

14-ayay u yeedhay raggiig urigeeda oo ay la hadashay, oo waxay ku tidhi, Bal eega, ninkaygu wuxuu inoo keenay nin Cibraani ah inuu inagu majaajiloodo. Wuxuu iigu soo galay inuu ila jiiifsado aawadeed, markaasaan cod dheer ku qayliyey,

15-oo markuu maqlay inaan codkaygii sare u qaaday oo aan qaliyey ayuu dharkiisii iiga tegey, wuuna cararay oo baxay.

16-Dharkiisiina way is ag dhigtay ilaa uu sayidkiisii guriga yimid.

17-Kolkaasay hadalkan kula hadashay, isagii, oo waxay ku tidhi, Addoonkii Cibraaniga ahaa, oo aad inoo keentay ayaa iigu soo galay inuu igu majaajiloodo.

-Waayo Yuusuf wuxuu rumaysnaa Ilaah, oo wuxuu diiday inuu la seexdo xaaskii Footiifar.

-Markuu diiday inuu la seexdo iyada, ayaa xaskii Footiifar, been ka sheegtay Yuusuf.

-Maxaa dhacay markii Footiifar guriga yimid?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 39:19-20a

19-Markii sayidkiisii maqlay hadalkii naagtiisa, oo ay kula hadashay isaga, iyadoo leh, Addoonkaagii sidan buu igu sameeyey, ayuu cadhooday.

20-Markaasaa Yuusuf sayidkiisii qabtay isagii, oo wuxuu geliyey xabsigii ahaa meeshii maxaabiista boqorku ku xidhnaayeen.

-Markii Footiifar yimid guriga, wuxuu rumaystay beentii ay xaaskiisa u sheegtay, oo Yuusuf buu xabbisay.

-Markii Yuusuf xabsiga la geliyey, miyaa Ilaah deyriley ama ka tegey?

-Maya.

-Ilaah weligiis kama tago qof isaga rumaysan.

-Ilaah wuxuu la jiray Yuusuf wakhti waliba.

-Weliba markii uu xabsiga ku jiray, Ilaah wuxuu la joogay Yuusuf.

Bal aynu akhrinno Bilwogii 39:20b-23.

20-Oo isna halkaasuu ku jiray xabsigii gudhiisa.

21-Laakiinse Yuusuf waxaa la jiray Rabbiga, wuuna u roonaaday, kii xabsiga hayayna raalli buu uga dhigay.

22-Kii xabsiga hayayna wuxuu Yuusuf gacanta u geliyey maxaabiistii xabsiga ku jirtay oo dhan; oo wax kastoo ay halkaas ku sameeyenna, wuxuu ahaa kii sameeyey.

23-Kii xabsiga hayeyna ma uu eegi jirin waxa isaga gacantiisa ku jira, maxaa yeelay, rabbigaa la jiray isaga, wixii uu sameeyeyna Rabbigu waa liibaaniyey.

-Weliba inkatoo Yuusuf walaalkiis nebcaa isaga, Yuusuf weli Ilaah buu rumaysnaa.

-Weliba inkastoo Yuusuf walaaladiis ay iaga u iibiyeen sida addoon oo kale, Yuusuf weli Ilaah buu rumaysan yahay.

-In kastoo Footifar xaaskiisa ay been ka sheegtay Yuusuf, haddana Yuusuf weli Ilaah buu rumaysnaa.

-Inkastoo Yuusuf xabsi la geliyey, Yuusuf Ilaah buu ku kalsoonaa.

-Waa kuma kii Xabsiga ku ilaaliyey Yuusuf oo la jiray?

-Ilaah.

-Maxaa Ilaah Yuusuf u eegayey?

-Waayo Yuusuf wuxuu garanayey inuu Ilaah ku dembaabay.

-Waayo Yuusuf wuxuu kaloo garanayey in dembigu keenayo dhimashada daa'imka ah.

-Waayo Yuusuf wuxuu kaloo garanayey in Ilaah oo keliya awood u lahaa inuu isaga badbaadiyo.

-Waayo wuxuu kaloo Yuusuf rumaysnaa in Ilaah isaga u soo dirayo Badbaadiyaha si uu ku badbaado.

-Miyey kula tahay in Ilaah ku illoobayo Yuusuf xabsiga?

-Maya.

-Casharka kan inoogu xiga, ayaannu ku arki doonnaa wixii Ilaah u sameeyey Yuusuf.